# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

## *DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA*

## لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 2 aad    Garoowe,    1 Febaraayo 2000    **Lam. 2**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA**    جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

**Sharci**


- **Sharci Lam. 6** ee 23/01/2000, kuna saabsan Qaynuunka Caafimaadka Puntland …………………………………………… **Bogga. 30 - 36**
- **Sharci Lam.7** ee 23/01/2000, kuna saabsan Dhismaha Rugta Ganacsiga Warshadaha & Beeraha Puntland …………………………… **Bogga. 37 - 45**
- **Sharci Lam. 8** ee 23/01/2000, kuna saabsan Qaynuunka Sanduukha Dhaqaalaha …………………………………………… **Bogga 46 - 47**


### Qaybta Labaad

Xeer

Waxba maleh

### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

**DAWLAD GOBO LEDKA PUNTLAND EE SOOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Ministry of Social Affairs**
**Directorate of Health**

Tix : ..........6......
Ref. :

Tariikh : ..............................
Date. :

QAANUUNKA CAAFIMAADKA PUNTLAND

**Ruqsadaha Wasaaradu Bixiso**

## QODOBKA 1AAD

**Farmashiyayaasha.**

Qodobkani wuxuu tilmaamayaa shuruuudaha ku xiran furitaanka farmashi, si loo sugo hagida howlahooda waxaa waajib ah marka lasiinayo ruqsada furitaan farmashi in lagu xiro sharuudaha hoos ku xusan.

1. Marka farmashi lafurayo ku yaal degaanka PL waxaa lafuri karaa marka lahelo ruqsada ogolaansho qaybta caafimaadka ee W.A/Bulshada, ogolaanshahaa ka dib waxaa la goosanayaa shati ka sharciyeysan W.A/Gudaha.
2. Farmashi waxaa furi kara qof kasta oo sharciga PL u ogolaanayo in uu kaganacsado gayiga PL haddii uusan ku xadgudbayn dastuurka PL ee sharciga caalamiga ah ee caafimaadka.
3. Farmashi waxaa laga furi karaa goob ku haboon oo wasaaraddu ogolaato waana in dhinac kasta farmashi ugu dhow u jiraa masaafo suuragal ah oo ay gooyaan guddiga loo xilsaaray.
4. Farmashi waxaa laga dhigi karaa qol dhererkuusa iyo balaciisu yihiin suuragal lehna hal albaab iyo ugu yaraan labo daaqadood iyo faama layro.
5. Farmashigu dawada lagu gadayaa waa in noqotaa daawo lahubiyey inay thay Daawada bani aadamka islamarkaana ka diiwaan gashan W. A/Bulshada qaybta caafimaadka.
6. Farmashigu haddii uu gadayo daawooyinka loo yaqaan Reagant sida Insolin, Siero Ant teetano IWM waa in uu lahaado ferinjeer lagu kaydiyo daawooyinka noocaas ah.
7. Daawada lagu gadayo Farmashi waa in xilligeeda dhacniinka ay kaharsantahay muddo macquul ah.
8. Waxaa mamnuuc ah in farmashi lagu gado daawo aan ahayn tan bani aadamka oo warshad daawo si sharci u samaysay, waxaa farmashiga kareeban in lagu gado daawada xoolaha iyo daawada dhaqanka (Tridisional madicine).
9. Waxaa mamnuuc in farmashigu daawo kagado qof aan dhakhtar u soo qorin haddii qof aan dhakhtar usoo qorin daawo laga gado wixii dhib ku yimaada wuxuu sharciga wajahayaa farmashiga, qofkaas sharci darada daawada uga gaday.
10. Farmashi daawo ma uugadi karo haddii uusan lahay shaqaale joogto ah oo leh aqoon caafimaad (qof utababaran).
11. Farmashi furuhu markuu Wasarada codsi usoo gudbinayo wasaaradda waa in ku soo lifaaqa shahaada caafimaad ee shaqaalaha u shaqayn doona farmashiga, iyadoo wasaaradu hubin doonto aqoontiisa caafimaad, bedelka uu ku samayana uu soo gudbiyo.

12. Farmashigu waa in uu leeyahay biyo tuubo oo joogta ah macnaha meel fara dhaq loogu talagalay ayna taal saabuun iyo tuwaal nadiif ah, wax kale oo laga rabaa qashinkaydiye dabool leh nadaafad joogta ah.
13. Farmashigu hortiisa waa in lagu dhajiyaa tabeele uu ku yaal magaca farmashiga.
14. Marka uu qofku helo ogolaansho wasaarada ee furitaanka farmashi waa in uu sameeyaa balanqaad qoraal oo uu ku codaynayo in uu fulinayo awaamiirta kasoo baxda wasaarada ee quseeya farmashiguusa oo aan ku cadayn shuruudaha kor ku xusan sida inuusan gadin daawooyin dalka mamnuuc ka ah.
15. Farmashi furuhu markuu helo ogolaanshaha W.caafimaadka uuna bixiyo khidmada ogolaanshaha ee wasaarada kadib ayuu goonmsanayaa shatiga dowlada hoose ee W.A.Gudaha.

## QODOBKA 2AAD

**Ruqsada furitaanka goob gaar ahaaneed ee dhakhta**

1. Marka la furayo rug gaar ahaaneed ee dhakhtar waa in lahelaa ogolaanshaha qaybta caafimaadka ee W.A.Bulshada, ogoloaanshaha kadibna lagoostaa shati ka sharciyeysan W.A.Gudaha, ee D.G/PL.
2. Dhakhtarka furaya goob shaqo waa inuu yahay dhakhtar haysta shahaado ay bixisay jaamacad leh awood sharci ee bixinta shahaadada dhakhtar, isagoo koobi shahaadadiisa ah kusoo lifaaqaya codsigiisa ruqsad raadinta iyadoo ay wasaaradu hubinayso aqoontiisa iyo cadaynta shahaadadiisa.
3. Dhakhtarka soo codsanaya ogolaanshaha ruqsada furitaanka goob shaqo waa inuu yahay dhakhtar leh waayo aragnimo iyo shahaado takhtarnimo.
4. Dhakhtarka furaya goob noocaan ah waa in uu haystaa qalabkiisa farsamo ee uga baahan yahay u adeega bukaanka.

5. Rugta noocaan ah waxaa mamnuuc ka ah in lagu sameeyo wax dhaafsiisan takhasuskiisa ama aqoonta uu shahaadada u haysto.
6. Rugta noocan ahi waa in ay leedahay Document raad raaca bukaanada si loo soo ururiyo xogaha bukaanada rugta soomara.
7. Dhakhtarka leh rugtaan waa in bil walba war bixin bileed usoo gudbiyo xafiiska wasaarada ee ku yaala degmooyinka ,Gobolada, ama xarunta ugu dhow ee qaybta caafimaadka Wasaaradda Arimaha Bulshada.
8. Rugtu waa in ay leedahay biyo joogto ah (faradhaq), qashin ururiyo dabool leh, iyo nadaafad joogto ah.
9. Rugtu waa in ay leedahay tabeelo uu ku yaalo magaca dhakhtarka oo sadexan iyo nooca taqasuska ee uugoobta ku qabto, tabeeluhu waa in uu leeyahay nal ifiya habeenkii.
10. Waa in uu dhakhtarku leeyahay warqada daawo qorista (Rejeeto Medico), kuwa shaybaarka iyo tiinbaro ugaar ah dhakhtarka .

## QODOBKA 3AAD

**Shuruudaha ilaalinta daawada dalka soo gasha.**

Marka daawo la keenayo dalka PL waa in lagu dhaqaa nidaam adag si loo hubiyo daawada ummadda la siinayo waxa ay tahay, hadaba waxaa lagartay in lagu dhaqo xeerkaan hoos ku qoran.

1. Qofka dalka daawo soogelinaya waa in uu marka hore heestaa ogolaanshaha wasaarada inuu daawo keeno.
2. Daawada dalka la soo gelinayo waa inay cadahay meesha ay kasoo baxday.

3. Waa in ay cadahay in ay tahay daawo dadka loo isticmaalo oo wadata ogolaanshaha xeerka caalamiga ah ee cadaynta daawada Beni aadmiga (IDA).
4. Daawo kasta oo dalka la soo gelinayo waa in ay marka ay dalka soo gaarto in ay dhicideeda ka harsantahay ugu yaraan labo sano.
5. Daawada markay dalka soo gasho waa in ay wadataa (lifelatiskeeda).
6. Daawada inta aysan dalka soogelin ama aysan dadweynaha ugudbin waa in laga diiwaangeliyaa wasaarada caafimaadka, sanbalkeedana la keenaa wasaarada si ogolaansho loogu helo.
7. Daawada dadweeynaha looma gudbinkaro ilaa ay wasaaradu kontoroosho sanbalkeeda oo lasiiyo fasaxa isticmaalka.

## QODOBKA 4AAD

### Shuruudaha hay'adaha aan dowliga ahayn ee wadaniga ah.(Ingos)

Si loo sugo loona hubiyo cidkasta oo caafimaadka bulshada rabta in ay wax kaqabato ayaa qaybta caafimaadka ee Wasaarada Arimaha Bulshada waxay soo saartay shuruudo lagu ictiraafayo NGO's ku hawlan hawlaha caafimaadka.

1. Cidkasta oo doonaysa in ay furato urur aan dawli ahayn ee caafimaadka ka hawlgala waa in uu ogolaansho ka helaa Wasaarada Arimaha Bulshada qaybteeda caafimaadka, marka uu fulinayo shuruudaha hoos ku xusan waa in uu goostaa shati ka sharciyeysan W.A.Gudaha.
2. Cidkasta oo doonaysa in ay furato urur aan dawli ahayn oo caafimaadka ka hawlgalaya waa in ay wasaarada u soo gudbiyaan nuqulka hay'ada oo originalka ah, ee documentiga saldhiga u ah NGO ga, oo ay ku cadahay in ururku uu yahay urur samofal oo aan siyaasad ka danbayn, ay ku cadahay qaabdhismeedkiisa iyo xubnihiisa.
3. Uruka waa in uu soo cadeeyaa hantida saldhiga u ah ee uu kaga qaybgalayo adeega caafimaadka, si uusan u noqon mid ku kooban dukumenti iyo mashaariic lala hoos galo hay'adaha caalamiga ah.
4. Ururka maadaama uu yahay mid caafimaad ka hawl galaya waa in uu marka uu ogolaanshaha soo codsanayo soo gudbiyaa liiska iyo marag kaca Tashiineed ee hawl wadeenadiisa caafimaadka.
5. Ururka waa in uu balan qaad bixiyaa uu ku balanqaadayo in uu fulinayo siyaasada caafimaadka PL.
6. Ururka waa in uu sadex bilood wasaaradda usoo gudbiyaa warbixin ay ku dhantahay wax qabadkiisa 3 billaha ah.
7. Ururka waa in uu qoraal cad ku bixiyaa in sharciga la waafajinayo haddii uu jabiyo qawaaniinta caalamiga ah ee caafimaadka iyo kuwa dowlad goboleedka Puntland, uuna isagu mas'uuliyadda qaadi doono hadii hawl galkiisa caafimaad qof ama bulshada ugaga timaado dhibaato farsamo.
8. Uruka waa in uu soo gudbiyaa marka uu dukumentiga soo gudbinayo min labo sawir xubnaha gudiga fulinta iyo saxiixa saddexan ee kaydka noqonaya ee xubnaha sharcigoodu u ogolaanayo inay awood saxiix leeyihiin:-
9. Ururka markuu fuliyo shuruudaha sare waa in uu qaataa ogolaanshaha Wasaaradda A.Bulshada qaybteeda caafimaadka, markaa ka dibna uu soo goostaa shati ka sharciyaysan Wasaaradda Arimaha Bulshada.

## QODOBKA 5AAD
## Shuruudaha Laga rabo takhtarka ajnabiga ah.

• Si loo hubiyo cid kasta oo caafimaadka Bulshada waynta Puntland ka hawl-geaysa ayaa takhaatiirta ajnabiga ahi ka howlgali karaan goobaha caafimaadka dowlada iyo goobaha gaar ahaaneed marka ay fuliyaan shuruudaha hoos ku xusan:

1. waa in uu yahay takhtar haysta shahaado takhtarnimo oo ay bixisay jaamacad haysta ictiraaf caalamiga ee awood shahaado bixin.
2. Haddii uu takhasus gaara leeyahay waa in uu heysta maregkac muujinaya takhasuskuusa.
3. Waxaa imtixaami doona guddi takhatiir ah oo wasaaraddu u saari doonto si ay u hubiyaan shahaadadiisa iyo aqoontiisa.
4. Waa in uu balanqaad qoraalla ku dhiibaa inuu ixtiraami doono, diinta, dastuurka iyo siyaasadda caafimaadka puntland.
5. Waa in uu iska bixiyaa waxii khidmadda ee si sharciga ugu waajiba.

## QODOBKA 6AAD
## Shuruudaha Laga Rabo Goobaha Gaarahaaneed Ee Umulisanimada

1. Cid kasta oo rabta in ay furato rug umuliso waa in ay haysatoo ruqsadda W.A.Bulshada qaybteeda caafimaadka.
2. Cidkasta oo furnayasa waa in ay haysataa shahaado sharciyaysan ee kalkaaliso-umuliso ama cid haysata ay ushaqeysaa,marag kacooda tacliimeedna ay soo gudbisaa.
3. Waa in rugtu leedahay qalabka hawsha umulinta, sida sariirta dhalmada, qalabka shaqada iyo qalabka jeermiga dila (autocalof).
4. Rugta waa in ay leedahay diiwaan, biyo joogto ah, nadaafad joogot ah, tabeelle uu ku yaal magaca rugta.
5. Rugta waa in ay leedahay qayb bixisa talaalada hooyada iyo dhalaanka gaar ahaan BCG-ilmahu marka uu dhasho.
6. Rugta waa in bil walba ay warbixin usoo gudbiso xafiisyada wasaarada kan ugu dhow.
7. Waa in ay iska bixiso khidmada ruqsada furitaanka, markaa ka diban ay goosataa shati ka sharciyaysan W.A.Gudaha.

## QODOBKA 7AAD
## Shuruudaha shaybaarada gaar ahaaneed.

1. Qof kasta oo furanaya shaybaar khuseeya caafimaadka dadka waa in uu haysto ruqsada W.A.Bulshada qaybteeda caafimaadka.
2. Cidkasta oo furanaysaa waa in ay heysataa shahaado cadaynaysa in uu aqoon u leeyahay cilmiga shaybarada.
3. Rugta waa in ay leedahay qaboojiye lagu kaydiyo (re-agentiga) baaritanka.
4. Rugtu waa in ay leedahay qalabka shaybaarka iyo warqadaha jawaabta.
5. Rugtu waa in bilwalba xarunta ugu dhow ee wasaaradda usoo gudbisaa warbixin.
6. Waa in rugtu ay iska bixisaa khidmada ruqsada furitaanka markaa ka dibna ay goosataa shati ka sharciyaysan W.A.Gudaha.

## QODOBKA 8AAD

### Khidmadaha Adeegyada Caafimaad Ee Joogtada Ah

- Wasaaradda A.Bulshada qaybteeda caafimaadku markay ka fekertay sidii goobaha caafimaadka ee bulshadu leedahay u noqon lahaayeen kuwa guta waajibaadka ummaddu ka sugayso.
  Markay ka fekertay sidii caafimaadka oo kharajka ku baxa aad u badan yahay sidii bulshada uga qayb qaadan lahayeen.

  Markay aqoonsantahay adduunka in aysan jirin meel caafimaadku bilaash yahay loogana danleeyahay in caafimaadku sii socdo haddii ay joogsato kaalmada shisheyaha.
  Ayey waxay go'aan satay in golaha wakiilada iyo golaha xukuumada u soo jeediso in caafimaadka dalka lagu soo rogo siyaasadda ah (costi recovery system) oo ah khidmad khfiifa oo la saarayo, adeega caafimaadka, taas oo aad uga hooseysa tan lagaga qaadodadwaynaha goobaha gaar ahaaneeEeg lifaaqa qiima goyntooda iyo qiimaynt noocyada farsamada.

## QODOBKA 9AAD

### Khidmadaha ku waajiba shaqooyinka gaar ahaaneed ee wasaaraddu bixiso ruqsadooda.

Wasaaradda A.Bulshada qaybteeda caafimaadku iyadoo fulinaysa sidii ku cadayd barnaamijkii dowladda saddexda sanad ee dowlada golaha wakiiladuna ansixiyeen oo ahayd dhiirigalinta minhadaha gaar ahaaneed (private sector), ayay waxay dejisay qidmadahaan oo ku waajibaaya marka la cadeeyo ruqsadaha howlaha caafimaadka, taas oo bixinteeda iska leedahay wasaaradda A.Bulshada,qaybteeda caafimaadka sida ku cad hawl qeexidii golaha dowladu usoo gudbiyeen golaha wakiiladu ansixiyeen.

1. Farmashiyaasha gaar ahaaneed markay fuliyaan shuruudaha ku xiran qaadashada ruqsada waxaa ku waajibaya khidmad dhan So.Sh 500,000 – oo hal mar ah.
2. Rug takhtar muwaadin ah marka uu fuliyo shuruudaha ku xiran qaadashad ruqsada waxaa ku waajibaya khidmad dhan. So.Sh. 800,000 oo hal mar ah.
3. Rug takhtar ajnabiga ah marka uu fuliyo shuruudaha ku xiran qaadashada ruqsada waxaa ku waajibaya khidmad dhan, 1,000 $ Dollar oo hal mar ah.
4. Rug umuliso gaar ahaaneed marka ay fuliso shuruudaha ku xiran qaadashada ruqsada waxaa ku waajibaya khidmad dhan So.Sh.200,000 oo hal mar ah.
5. Rug shaybaar gaar ahaaneed marka uu fuliyo shuruudaha ku xiran qaadashada ruqsada waxaa ku waajibaya khidmad dhan So.Sh. 600,000 oo hal mar ah.
6. Qofka codsada in uu daawo ama qalab caafimaad oo ganacsi ah soo dejiyo marka uu fuliyo shuruudaha ku xiran qaadashada ruqsada waxaa ku waajibaya khidmad dhan So.Sh.1,500,000 safarkii kasta oo cusub.

## QODOBKA 10AAD

### Shaqada Wasaarada Iyo Wasaaradah Kale

Waxaa Wasaarada A. Bulshada qaybteeda Caafimaadku iyadoo ay tixraacayso sharcigii shaqo qeexista Wasaarada Dawlada oo ay ansixiyeen Golaha Xukuumada iyo Golaha Wakiilada Madaxwynuhuna Saxiixay ayay soo saartay Qodobada hoos ku xusan:

1. In dawlada hoose ee wasaarada arimaha guduhu aysan bixan karin shati ganacsi goobo gaar ahaaneed ee cafimaad ilaa ganacsaduhau layimaado ogolaansho ruqsada wasaarada A.

5

Bulshada – Qaybteeda Caafimaadka, oo iyada waajibaadkeeda uu yahay bixinta ruqsadaha goobaha caafimaadka marka ay fuliyaan shuruudaha ku xiran.

2. In Hay'adaha daqliga Dawlada ay joojiyaan lacagta aan sharciga waafaqsanayn ee ku bixiyaan caafimaadka dadka tirada badan oo dibada loo diro, taas oo aan lagala tashan qaybta caafimaadka arintaasina ay keentay in lacag adag qof loo siiyo, xaalad caafimaad oo dalka wax looga qaban karo, amaba aan jirin, kuwa arintooda wax dalka looga qaban karo oo dalalka shisheeye loo diro waxay sumcad xumao ku rideen, sumcada Takhaatiirta Puntland oo leh aqoon lagu faani karo dalkana ay yaalaan qalab casriya oo caafimaad oo aysan haysan dalal badan oo dariskeena ah oo maanta dawlad ka jiro. Qaybta caafimaadka WAB, waxay diyaarisay gudi Takhaatiir oo takhasusyo kala duwan leh oo go'aan ka gaara qofkii arintiisa aan dalka wax looga qaban karin.

## QODOBKA 11AAD
## Mamnuucida Waxyaalaha Hlista Ku Ah Caafimaadka Bulshada

Wasaaradda A.Bulshada qaybteeda caafimaadku iyadoo gudanaysa waajibaadka ka saaran Daryeelka Caafimaadka Bulshada iyo ka hortagida waxii halis ku ah caafimaadka Bulshada puntland ayey labada golle waxay usoo gudbinaysaa mabnuucida waxyaalaha ku xuxusan qaybaha hoose ee qodobka 27aad.

A) **Mamnuucidda Gudniinka fircoonga (FGM)**:- marka la arkay dhibta uu ku hayo caafimaadka iyo nolosha dhediga aadamiga Puntland, uusana lahayn waajibaad diiniya oo ina faraya, si loo badbaadiyo haweenka oo ah qaybta ugu mudan in la bad baadiyo waxaa la mamnuucay Gudniinka Fircooniga cidii samaysa, cidii dhiirigelisa iyo cidii ku khasabta ilmo yar waxaa la horgaynayaa oo la waafajinayaa xeerka ciqaabta uu muteysto.

B) **Mamnuucid Goobaha Dhilaysiga** :- iyadoo dalalka soomaaliya ku heerarsan ay ka mid yihiin dalalka aduunka ugu sareeya xadiga Aids-ka, baaritaano kooban oo lagu sameeyay gobolada Puntland laga helay, uuna marayo xadi la kontorooli karo, ayaa la mamnuucay goobaha lagu macsiyeysto oo ka furan magaalooyinka qaarkood, maadaama Galmadu ay tahay habka ugu xoog wayn siyaabaha uu ku fido cudurkaan cidii furta goobo macsiyeed, ama dhiirigalisa ama rug ay leeyihiin ka kiraysa waxaa la waafajinayaa xeerka ciqaabta.

**C) Mamnuucidda ilmaha lagu dillo-uurka hooyadiis (Aborto-ilegala).**

Waxaa la mamnuucay in la dilo ama la soo tuuro ilmo ilaah ku abuuray minka hooyadiis, haddii aan la hayn qiil caafimaad oo ugu yaraan saddex takhtar isku raacday oo lagu bad baadinaayo hooyada, takhtarkii ama cidii samaysa dhicin aan sharci ahayn (Abarto ilegale) waxaa la waafajinayaa xeerka ciqaabta.

D) **mamnuucidda in qof isku dayo in uu is dilo (Tentativo di sucidio)**

Waxaa mamnuuc ah in qof isku dayo in uu isdillo sida isagoo suncaba, isgoo, isdaldala, ama xabad iskudhufta IWM. Haddii sida inta badan dhacda badbaado loo keeno goobaha caafimaadka, waxaa lagu dadalayaa sidii loo badbaadin lahaa, isla markaana shaqaalaha caafimaadka waxay wargalinayaan hay'adaha amniga si marka uu badbaado loo waafajiyo xeerka ciqaabta, shaqale caafimaad oo isku daya in uu qariyo qof isku dayey in uu isdilo oo aan ogaysiin hay'adaha amniga isagana waxaa la waafajinayaa xeerka ciqaabta.

E) **Mamnuucida cuntada,sharaabka iyo daawada dhacday**

Waxaa mamnuuc ah in dalka la soo galiyo, cunto, sharab, iyo daawo dhacday la soo gasho dhammaan degaanka Puntland, haddii la qabtana marka la hubiyo waa lagubayaa,qofkii watayna waxaa la waafajinayaa xeerka ciqaabta haddii la qabto iyadoo soo dhaaftay kastamada

dalka oo suuqa ku jirta waxaana la waafajinayaa go'aanka sare, mas'uuliyiinta iyo shaqaalaha howshaas u qaabilsanayd kastamka ay ka soo gashay iyagana waxaa la waafajinayaa xeerka ciqaabta.

F) Mamnuucida in muwaadin laga gado ama la siiyo dawo uusan qof muwaadin ah la siiyo daawo uusan ansixin qof haysta mid ka mida shahaadooyinka caafimaad ee kala duwn, haddii ay dhacdo oo uu wax ku noqda ama la ogaado waxaa mas'uuliyadda qaadaysa cidii siisay waxana la wafajinayaa xeerka ciqaabta.

G) **Mamnuucida dadka sheegta aqoonta caafimaad oo aysan lahayn.**

Waxaa la mamnuucay in qof sheegto ama ku shaqeeyo xirfada caafimaad oo uusan shahaadadeeda sharciga ah, qaadan sida (Takhtar,Kalkaaliye,Shaybarista umuliso Iwm) hadii laqabto qofkaas waxaa la waafijinayaa xeerka ciqaabta uu mutaystay.

**QODOBKA 12AAD**

Waxaa la buriyey Qaanuun kasta oo ka hor imaanaya Qaanuunkaan

**QODOBKA 13AAD**

Qaanuunkaan wuxuu dhaqan gelayaa maraka golaha wakiilladu ansixiyo madaxweynuhuna saxiixo, wuxuuna ku soo baxayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WADASHAQEYN WACAN

Madaxweynaha dawlada-puntland
***Mudane:c/lahi yusuf axmed*** **23/01/2000**